

Ku socoto dadka xambaarsan caabuqa cagaarshowga nooca B (Hepatit B)

Oggolaansho ah in dhakhtarka carruurta uu wax kala socon karo tallaalka lagu talinayo in la siiyo ilmaha murjuqa ah ee mar dhow la dhalay, iyada oo warbixintaas laga eegayo qoraalka dhacdooyinka caafimaad ee hooyada uurka leh.

Khatarta ah in uu cunugga xittaa qaado caabuqa cagaardhowga nooca B aad ayuu u yaraanayaa haddii la tallaalo. Qiyaasta koowaad ee talaalka waxaa la siiyaa maalinta koowaad ee uu dhasho.

Oggolaanshaha waxaa loola jeedaa in uu dhakhtarka carruurta oggolaansho u helayo in uu akhriyo qoraalkaada dhacdooyinka caafimaad, halkaas oo laga helayo tallaalka lagu talinayo in cunugga aad sugayso la siiyo.

Umulisada joogta qeybta qaabilaadda ee umulisada ayaa ku weydiin doonta kadibna waxey oggolaanshahaaga ku qoreysaa qoraalkaaga dhacdooyinka caafimaad.

Waxaa soo saaray:

Waaxda caafimaadka hooyada iyo dhallaanka ee Gobolka Stockholm

2023-06-02.